



Xatooyo ah aqoonsiga ayaa ku dhacda bulsho kasta, afkaaga hooyo ku hel caawimaad

Ma u maleyneysaa inuu qof kaa xaday aqoonsigaaga? noogu soo sheeg af Soomaali.

Soo garaac 877-438-4338 oo taabo lambar 3 si aan kuugu helno turjubaan

FEDERAL TRADE COMMISSION
[IdentityTheft.gov](https://www.ftc.gov/identitytheft)

[Toddobaadka Wacyigelinta Xatooyada Aqoonsiga](#) waa marka la barto sida loo garto, looga fogaado, iyo sida loo soo sheego xatooyada aqoonsiga. Sida ay u badan tahay, waxaad garaneyso ay dhacday xatooyada aqoonsiga. Xatooyadaasi waa marka uu qof isticmaalo macluumaadkaaga shakhsiyeed ama wax adiga ku khuseeya

adiga oo aan ogeyn si uu wax ugu khiyaamo. Waa wax ku dhici kara qof kasta, iyo bulsho kasta. Haddaba sidee baad afkaaga hooyo ugu heli kartaa caawimaad?

Ka akhriso warbixin cusub, [Sida loo Garto, Looga Fogaado, iyo Sida Afkaaga Hooyo loogu soo Sheego Xatooyada Aqoonsiga](#) barta [ftc.gov/languages](https://www.ftc.gov/languages). Baro waxa ay tahay xatooyada aqoonsiga, sida loo garto, waxa aad sameyn karto si aad u ilaashato aqoonsigaaga, iyo meesha aad u sheegeyso oo aad caawimaad ka heli karto. Si aad u dalbato wacyigelin bilaash ah oo ku qoran luuqadaha kala ah Ingiriis, Isbaanish, Shiineys Fudud, Kuuriyaan, ama Fiyetnaameys iyo si aad dadka kale ugu sii sheegto, booqo [ftc.gov/bulkorder](https://www.ftc.gov/bulkorder). Waxaad ku caawin kartaa bulshadaada inaad dadka u baahan u sheegto sida loo ilaashado macluumaadka — iyo weliba waxa la sameyn karo marka laga shakiyo xatooyada aqoonsiga.

Balse hadda waxaa fududaatay in FTC luuqad kasta loogu soo sheego xatooyada aqoonsiga. Markaad u soo sheegto wax kugu dhacay, waxaad lagugu caawinayaa waxaad sameyneyso. Si aad afka Ingiriisi wax ugu soo sheegto, gal barta [IdentityTheft.gov](https://www.ftc.gov/identitytheft). Afka Isbaanishka, booqo [Robodentidad.gov](https://www.ftc.gov/robodentidad). Haddii aad luuqad kale ku soo sheegeyso xatooyada aqoonsiga, soo garaac (877) 438-4338 inta u dhaxeysa 9ka aroornimo ilaa 5ta galabnimo Wakhtiga Bariga. Taabo lambar 3 iyo luuqadda aad rabto si lagu helo turjubaan oo aan warbixin kaaga helno.

Cilmibaaris ayaa waxaa lagu soo ogaaday in ay dadku ku kalsoon yihiin inay macluumaadka ka helaan dadka ay aaminsan yihiin. Sababtaas awgeed: fadlan qoyska iyo asxaabtaada bulshada la wadaag waxaad garaneyso.